

## **Amarka L. 19 rep**

**Awoodda Madaxda Mamulka Dawladaha Hoose inay soo saaraan tallaabooyin deg-degga oo leh dabeecad ku-meelgaara.**

### **MAAMULKA WASAAYADDA TALYAANIGA EE SOOMAALIYA**

#### **MAAMULAHA**

Marka uu arkay dekereetda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaanigaga ee 9 isember 1952, lamba. 2357;

Marka uu garowsaday in ay habboontay in loo oggolaado Madaxda Mamulka Dawladaha Hoose awood ay ku soo saari karaan tallaabooyin deg-degga oo leh dabeecad ku-meelgaara;

Marka uu arkay qod. 4 ee Bayaanka Mabaadiidda Dastuuriga ee ku lifaqaan Heshiiska Ilaalinta;

Marka uu arkay uu arkay qod. 8 ee Heshiiska Ilaalinta Dalka Soomaa;

Marka uu arkay qod. 4 ee dekeretada Madaxweynaha Jamhuuriyadda Talyaaniga;

### **WUXUU AMAR KU SOO SAARAYAA**

#### **Qod. 1**

Madaxa Maamulka Dawladda Hoose wuxuu adeegsan karaa xaaladaha deg-degga jira in uu qaato tallaabooyin la xariira dhismaha, nadaafadda iyo faya-dhowrka maxalliga, sababa la xariira caafimaadka iyo ammaanka guud, iyo ay fuliyaan amarro la xariira, oo kharashkooda ay isku qabaan kuwa danaha ka leh, iyadoo aan wax u dhibayn dacwad ciqaaba oo la oogo, haddii falku uu dambi sababay. Tallaabooyinkaas waa in si deg-egga loo wargaliyaa Guddoomiyaha Gobolka kaasoo looga baahanyahay in uu ansixiyo La-talintu Dawladda Hoose. Awooddaaso kale waxaa loo oggolyahay Guddoomiyaha degmada aan goobahiisa ka dhisnayn maamul dawlad hoose.

Kharashka hawlaha la soo sheegay waxaa fulinaya masuuliinta u xilsaaraan Maamulka Dawladda Hoose, marka la dhagaysto cidda ay khusayso, waxaana lagu suurtagelinayaa uruurinta qaabka iyo mudnaanta canshuureed ee uu degsan canshuurta Dwladda hoose. Qaraarada Maamulka Dawladda Hoose waxaa la oggolyahay in cabasha looga qaato Guddoomiyaha Gobolka.

#### **Qod. 2**

Cidda jabisa amarka uu soo saaro Maamulka Dawladda Hoose sida uu qabo qodobka sare waa haddii arrinta aanu xeer kale ka dhigayn fal-dambiyeed, waxaa la marsiinayaa ciqaabta ku xusan amarka lr. 20 ee soo baxay 11 Setember 1954 kaaso sheegaya ciqaabta u degsan xadgudubyada nidamyada gobollada.

Waxaa la oggolyahay in saddaqa lagu bixiyo xaaldaha iyo qaabka habka nidaamka la soo sheegay.

Muqdisho, 11 Setember 1954.

Maamulaha

**Martino**